

Warbixinta qorshaha gaarka ah ee qofka ka qaybqaadanaya waxbarashada af-norwiiijiga iyo aqoonta bulshada iyo qofka ka qaybqaadanaya borogaraamka wax baridda (introduksjonsprogram)

Adiga iyo degmada ayaa wadajir u samaynaya qorshe gaar kuu ah adiga ka qaybqaadanaya waxbarashada af-norwiiijiga iyo aqoonta bulshada, iyo qofka ka qaybqaadanaya borogaraamka wax baridda.

Qorshaha gaarka ah ee qofka waa heshiis wadashaqayn oo adiga iyo degmada idinka dhexeeya kuna saabsan wax bariddaada.

Qorshahaaga gaarka ah waa go'aan dawladeed (enkeltvedtak), waana dukumiinta sharci ah.

Wax baridda cilmiga bulshada waxaa lagugu siinayaa warbixin ku saabsan xuquuqda, waajibaadka, fursadaha iyo waxyaalaha qiimiga leh ee muhiimka ka ah bulshada norwiiijiga dhexdeeda.

Hadafka wax bariddu waa in aad sida ugu dhakhsaha badan ee suurtaggalka ah shaqo ama waxbarasho u hesho si aad u gaarto madaxbannaani dhaqaale oo aad si firfircoon uga qaybqaadato bulshada norwiiijiga.

Ku saabsan qorshaha gaarka ah ee qofka

Wax bariddu waa in ay noqotaa mid qofka ku habboon kuna salaysan u kuurgelid loo yeeshay waxbarashadaada, khibraddaada shaqo, aqoontaada shaqo, iyo wixii kale ee warbixinno ah ee micno u samaynaya qorshahaaga la doonayo in aad aqoon ku kasbato.

Qorshahaaga gaarka ah waxaa la diyaarinayaa iyada oo lagu salaynayo waxa ka soo baxa u kuurgelidda iyo baahidaada. Hadafkaaga wax baridda waxaa la dhigayaa iyada oo loo eegayo waxa u kuurgalka ka soo baxa.

Qorshaha gaarka ah waa in ay ku qoran yihiin hadafyo la taaban karo oo wax baridda lagu gaarayo, muddada hadafyadaas lagu gaarayo, inta saacadood ee lagu siiyay, iyo goorta iyo goobta ay wax bariddu dhici doonto. Diyaarinta qorshahaaga gaarka ah adiga ayaa lagula kaashanayaa.

Haddii ay jiraan dhibaatooyin bulsho ama kuwa caafimaad oo saamayn ku yeelan kara ka-qaybqaadashadaada wax baridda, waa in iyagana loo kuurgalaa.

Si aad u gaarto heerka aad doonayso, waa in ay wax bariddu billowgaba ahaataa mid hadafka toos u abbaaraysa. Habkaas ayaadna ku gaaraysaa natiijada ugu wanaagsan. Wax baridda waa in la waafajiyaa xaaladda noloshada, oo laysugu dubaridaa hab kuu suuragelinaya in aad ka qaybqaadato xataa haddaad carruur yaryar haysato iyo/ama haddii aad shaqayso. Qorshahaaga gaarka ah waa in uu ahaadaa mid ku habboon baahidaada maaddo iyo midda baraatiko labadaba.

Degmada waxaa waajib ku ah in ay kuu fidiso wax barid gaaraysa ilaa iyo heerka B2 haddii heerkaas lagu gaari karo 600 ee saacadood ee waajibka ah, ama ilaa iyo heerka B1 haddii heerkaas lagu gaari karo tirada guud ee dhan 3000 oo saacadood.

Inta ay wax bariddu socoto ayay degmadu wadahadal kula yeelan doontaa iyada oo lagaa waraysan doono sida uu qorshahaaga gaarka ahi u socdo. Haddii loo baahdo qorshaha wax baa laga beddelayaa, tusaale ahaan haddii ay is-beddello waaweyn ku yimaadaan xaaladdaada nololeed. Haddii is-beddello waaweyn oo muhiim ah lagu sameeyo qorshaha gaarka ah, waxaad markaas samayn kartaan qorshe cusub.

Haddii aadan raacin qorshahaaga gaarka ah, ama aad doonayso in aad qorshahaaga beddesho, waa in aad sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah ula xiriirtaa qofka xiriiriyaha kuu ah.

Ma doonaysaa in aad ka cabato qorshahaaga gaarka ah?

Waad ka caban kartaa wax baridda iyo waxa uu ka kooban yahay qorshahaaga gaarka ah labadaba. Haddii gadaal lagaaga sameeyo qorshe gaar ah oo cusub xataa saddex toddobaad gudahood ayaad kaasna uga caban kartaa, saddexdaas toddobaad oo ka billaabana marka beddelaadda la sameeyay lagu sheegay. Haddii aad cabasho qaadanayso waa in aad:

- Cabasho soo xaraysaa saddex toddobaad gudahood laga billaabo marka aad hesho waxa uu qorshahaaga gaarka ahi ka kooban yahay
- Cabashada geysaa degmada hay'addeeda gaartay go'aanka qorshahaaga gaarka ah
- Qortaa waxa aad ka cabanayso
- Waa in aad cabashada saxiixdaa

Qof wakiil kaa ah xataa cabashada wuu kuu qaadi karaa. Si haddaba uu qofi kuu matalo oo cabasho kuugu qoro, waa in aad qofkaas taas si qoraal ah ugu oggolaataa. Oggolaashada waa in ay ku caddahay waxa uu qofka wakiilka ahi qaban karo isaga oo ku matalaya. Haddii aad qareen leedahay oggolaasho looma baahna.

Haddii aad dhigato borogaraamka wax baridda

Haddii aad dhigato borogaraamka wax baridda, qorshaha gaarka ah ee barashada af-norwiijigu wuxuu ku jiraa qorshaha gaarka ah ee wax baridda.

Warbixin intan ka badan oo ku saabsan barashada af-norwiijiga iyo cilmiga bulshada iyo qorshaha gaarka ah waxaad ka helaysaa xeerka wax baridda (introduksjonsloven). Xeerka oo wareegto la socoto waxaad ka helaysaa www.imdi.no iyo bogagga internetka ee Aqoonta Norway (Kompetanse Norge).

Ku guuleyso waxbarashada!